

# Xarayso Canshuur Celin si aad Lacag Dib Ugu Hesho



Waxaad u qalmi kartaa lacag gaaraysa kumanaan doolar oo ah canshuur celintaada ah marka aad sheegato Lacagta Dhakhliga Shaqada Ee La Xisaabiyo ee federaalka iyo Lacagta Carruurta La Taageero Ee Canshuurta Lagu Xisaabiyo

## Sida loo Helo Lacagtaada Canshuurta Lagu Xisaabiyo:

- 1 Fiiri in aad u qalantoiyo in kale**  
Tirada lacagta laga yaabo in aad heli karto ka ogow [TaxOutreach.org/TaxCredits](https://www.taxoutreach.org/taxcredits).
- 2 Hel canshuur xarayn LACAG LA'AAN AH oo lagaa caawiyo**  
Booqo [GetYourRefund.org](https://www.getyourrefund.org) ama wac 800-906-9887, xataa haddii aadan sida caadiga ah canshuur xarayn.
- 3 Canshuurtaada xaree**  
Hel in lagaa caawiyo canshuur celintaada muddo ku beegan Oktoobar 1, 2023.

## Waxa loo soo qaadanayo ballanta canshuurta:

- Aqoonsi Sawir leh oo sax ah
- Kaarka Social Security-ga ama warqadda cadaynta Lambarka Social Security-ga, ama ITIN loogu talagalay qof kasta oo ka tirsan canshuur celintaada
- Foomamka W-2 ama 1099
- Foomka 1095-A
- Ogeysiinta IRS oo kasta
- Canshuur celintii 2020 iyo 2021, haddii aad haysato
- PIN-KA Ilaalinta Aqoonsiga (IP PIN), haddii aad leedahay mid



Wixii macluumaad dheeraad ah, booqo [TaxOutreach.org/TaxCredits](https://www.taxoutreach.org/taxcredits) ama waxaad IRS ka wacdaa 1-800-829-1040



## Lacagta Dhakhliga Shaqada Ee La Xisaabiyo (EITC) iyo U qalmida Lacagta Carruurta La Taageero Ee Canshuurta Lagu Xisaabiyo (CTC):

**Haddii aadan lahayn carruur waxaad u qalmi kartaa EITC gaaraya ilaa \$560 haddii:**

**Da'da:**

Aad u dhaxaysay 25-64 sano Diisambar 31, 2022.

**Dakhliga 2022:**

Aad samaysay wax ka yar \$16,480 (\$22,610 haddii aad guursatay).

**Haddii aadan ahayn Muwaadin Maraykan ah waad u qalmi kartaa haddii:**

► **EITC:** Adiga, qofka aad isqabtaan, iyo ilme kasta oo aad sheegato ay leeyihiin Lambarka Social Security-ga (SSN) oo sax ah.

► **CTC:** Ilme kasta oo aad sheegato leeyahay SSN. Adiga, qofka aad isqabtaan waa in ay haystaan SSN ama Lambarka Aqoonsiga Cashuurta ee Shakhsiga (ITIN).

## Ma u qalma?

**Marka la joogo wakhtiga canshuurta, waxaa laga yaabaa in lacag yar cashuurta lagugu yeesho islamarkaana ay lacagi kuu soo laabato** marka ay jirto Lacagta Dhakhliga Shaqada Ee La Xisaabiyo iyo Lacagta Carruurta La Taageero Ee Canshuurta Lagu Xisaabiyo! Haddii aad shaqaysay 2022, waxaa dhici karta in aad u qalanto lacagahani canshuurta lagu xisaabiyo.

**Faa'iidooyinka Dadweynaha:**

- Sheegashada lacagahani canshuurta lagu xisaabiyo ma beddeli doonto u qalmidaada gargaarada federaalka sida SNAP (kaararka cuntada), SSI, Medicaid, taageerada lacageed, ama guryaha dadweynaha.
- Haddii aad kaydsato cashuur celintaada, laguma xisaabinayo xadka u yaala wixii faa'iido barnaamij lacageed/hanti ah ee federaalku ay bixiso muddo illaa 12 bilood ah ka dib marka lacagta la soo celiyay la helo.

## Haddii aad leedahay carruur waxaad u qalmi kartaa EITC iyo CTC haddii:

**Deganaanshaha:**

► Carruurta kula noolaayeen wax ka badan kala bar sanadka 2022.

**Da'da – carruurta waa in ay yihiin:**

► **EITC:** 18 ama ka yar yihiin Diisambar 31, 2022 (ardayda waqtiga buuxaa way ka yaraan karaan 24 iyada oo carruurta sida buuxda ee rasmiga ah naafada ah da' kasta ay jiri karaan).

► **CTC:** 16 ama ka yar yihiin Diisambar 31, 2022.

**Dakhliga 2022:**

► **Si aad u heshid CTC federaalka**, haddii aad samaysay wax ka badan \$2,500, waxaad sheegan kartaa lacag gaaraysa \$2,000 cunugiiba.

► **Si aad u heshid EITC ee federaalka**, lacagaha aad samaysaa waa in ay ka yar yihiin xadkan la dejiyay ee soo socda:

Tirada Carruurta	Shaqaalaha kalida ah ee aan guursan ee leh dakhli ka hooseeya:	Shaqaalaha guursaday ee leh dakhli ka hooseeya:	EITC gaaraya ilaa:
1 ilmo	\$43,492	\$49,622	\$3,733
2 carruur ah	\$49,399	\$55,529	\$6,164
3 ama ka badan oo carruur ah	\$53,057	\$59,187	\$6,935

## Ma aha waqti aad u dambeeya in la sheegto lacagaha canshuurta lagu xisaabiyo ee la ballaariyay ee 2021!

Iyada oo sababtu ahayd cudurka baahsan, EITC iyo Lacagta Carruurta La Taageero Ee Canshuurta Lagu Xisaabiyo oo la ballaariyay oo laga dhigay mid ay heli karaan dad badan. Ballaarintaasi way joogsatay, LAAKIIN haddii aad u qalmaysay EITC la ballaariyay ee 2021, Lacagta Carruurta La Taageero Ee Canshuurta Lagu Xisaabiyo ee la ballaariyay ee 2021, ama mid kasta oo ka mid ah saddexdii wareeg ee jeegagii dhiirigelinta ahaa 'stimulus checks' oo aanan la sheegan, ma aha waqti aad u dambeeya! Booqo [TaxOutreach.org/expanded](https://www.irs.gov/charity-epfp/epfp-outreach) si aad u ogaato waxyaabo dheeraad ah.